

# Sidaan wax u caawino



TUSAHA ADEEGYADA DoCS

Wasaaradda Adeegyada Bulshada ee NSW (DoCS) waa ururka ugu horeeya adeegyada bulshada NSW iyo wakaalada ugu balaaran ee ilaalinta carruurta Australia.

Buuggan yari wuxuu sharxayaa siyaalaha badan ee aan wax u caawino.

## CAAWIMTA SI CARRUURTA AMMAANKOODA LOO SUGO IYO QOSASKA OO WADA JIRA



Shaqadeena ugu muhiimsan waxaa weeye in carruurta ammaankooda la sugo, ilaalintooda iyo wanaagooda.

Sannad kasta, kumanaan carruur ah ayaa waxaa na soo ogeysiya saaxiibo, qoys iyo dad xirfadlayaal ah inay ku jiraan khatar waxyeelo u geysaneysa oo ah dayacaad ama waxyeeleyn. Warbixinadaan waan qiimeynaa haddii loo baahdana waan baarnaa oo aan la shaqeynaa qoysaska si aan u hubino in carruurta iyo dhalinyaraduba ay ammaan qabaan. Waxaan sidoo kale la shaqeynaa wakaaladaha kale, oo isugu jira labadaba kuwo dawladeed iyo kuwa gaar ahba, si aan u hubino in carruurta iyo qoysaskuba ay helaan taageerada ay u baahan yihiin.

Waxaan ka shaqeynaa sidii aan uga hortegi laheyn ama aan u xalin lahayn inay kala go'aan dhalinyarada iyo waalidkood. Shaqo la'aanta, rabshada qoyska, aalkolada ama daroogo ku tiirsanaanta, jirro maskaxeed ama jireed ama dhibka koritaanka carruurta waa qaar ka mid ah arimaha dhibaatooyin ka dhalin kara qoyska dhexdiisa.

Ka hortagayaga iyo barnaamijyada hore u dhexgelida, waxaan la shaqeynaa qoysaska si aan isugu deyno inaan xal u helno dhibaatooyinka anagoo si toos ah ula hadleyna carruurta iyo waalidkood. Haddii ay suurto gal tahay waxaan jecelnahay inaan ka qaybgelino wallaalaha gabdho iyo wiilalba, ayeeyooyinka/awoowayaasha iyo xubnaha kale ee qoyska. Ahmiyadeenu waxaa weeye inaan caawino sidii ay qoysasku uwada joogi lahaayeen.

Haddii qof dhalinyara ahi uusan ku noqon Karin guriga sababtuna ay tahay ammaan darro, waxaan u sameyn karnaa meel ay joogaan – iyo xannaaneeye masuul ka noqda ama hoy la kormeero sida hoyga dhalinyarada.

Haddii aad u maleynayso qof aad taqaan- xitaa ilmahaaga – inuu khatar ugu jiro waxyeelo si uun, fadlan wac Khadka Taleefanka ee DoCS

Dadka dhalinyarada ah ee u baahan macluumaadka iyo tallada waxay la xiriiri karaan Khadka Caawimaada Carruurta, waalidiinta u baahan taageeradana waxay wici karaan Khadka Taleefanka Waalidka.

Cid kasta oo ay haysato rabshada gurigu waa soo weci kartaa Khadka Taleefanka Rabshada Guriga ee DoCS

Lambaradan waxaa la soo garaaci kartaa bilaash wakhti kasta, meel kasta oo ka mid ah gobolka.

Khadka Taleefanka  
Caawimaada DoCS  
132 111  
TTY\* 9633 7698

Khadka Taleefanka  
Caawimaada Carruurta  
1800 551 800

Khadka Waalidka  
(Centacare) 1300 1300 52

Khadka Taleefanka  
Rabshada Guriga  
1800 656 463  
TTY\* 1800 671 442

\* TTY waa tasiilaad caawinaya  
dadka maqalkoodu  
dhimman yahay.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad ogaato wax badan oo ku saabsan adeegyada DoCS ee goobta aad degan tahay, fadlan la xiriir Xarunta Adeegyada Bulshada DoCS ee kuugu dhow (CSC). Waxaan leenahay wax ka badan 80 CSCs NSW oo dhan, oo badanaa ku yaal ama u dhow xarumaha magaalada ama xarumaha dukaamada xaafadaha.



NEW Department of  
Community Services

## SIINTA XANNAANO CARRUURTA AAN LA NOOLAAN KARIN WAALIDKOOD



Xannaano guriga ka baxsan ayaa ah ta ugu muhiimsan ee aan carruurta ku xannaaneyno aan waalidkood la noolaan Karin.

Xannaanada ayaan bixinaa anagoo la wadaageyna lamaanayaashayada bulshada. Tan waxaa ka mid ah wakaalada sida Centacare, Burnside and Barnardos.

Xannaanada guriga ka baxsan waxay siisaa ammaan, nabadgelyo and nolol qoys oo raaxo leh carruurta siyaalo kala duwan aan ula noolaan Karin waalidkood. Xannaanadan waxaa ku mid ah ku meeleynta xubno kale oo qoyska ka mid ah ama qaraabooyin kale.

(bulshooyinka Aborjuniiska waxaa loogu yeeraa tan 'xannaanada qaraabada'), xannaanada dad kale ama xannaanada degaaneed.

Ujeedadayadu waxaa weeye in carruurta dib loogu soo celiyo qoyskooda meel alaale meeshii suurto gal ah, saa daraadeed, xannaanada guriga ka baxsan badideeda waa wakhti gaaban oo keliya. Haddii aysan tani suurto gal ahayn, waxaan u raadinaa qoys uu wakhti dheer la noolaan karo ilmuhu ama qofkan yari oo uu ku dhex karo.

Had iyo jeer waxaan u baahan nahay xannaaneeyayaal badan. Xannaaneeyayaashu waxay ka ciyaaraan door aad iyo aad u muhiim u ah xagga taageerida xiriirka ilmo kasta iyo qoysiiskiisa.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad noqoto xannaaneeye, ama aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ilmo heynta, fadlan la xiriir Xarunta Adeegyada Bulshada DoCS ee kuugu dhow

Waxaad ka haysaa lambarada lagala xiriiro xafiis kasta oo ay leedahay DoCS boggaga 5-6 ee buuggan yar.

## CAAWINTA DADKA AY KALA LUMEEN WAALIDKOOD INAY HELAAN DIIWAANKOODA



Waxaan caawinaa dadka aanu xannaaneyn jirney ama aan soo koriney inay helaan macluumaad iyo diiwaan.

Degmooyinkii hore ee gobolka, ama dadka hoos umanayey masuul waalidnimo Wasiirka Adeegyada Bulshada, ayaa xaq u leh inay arkaan waxyaalaha ku saabsan diiwaanka Wasaarada. Sababta loo xaaneynayey iyo wakhtigii la xannaaneynayey. Tani waa adeeg bilaash ah. Shaqaalaha Xarunta Adeegyada Bulshada ee DoCS ayaa kuu heli kara diiwaanka. Haddii aad degan tahay meel ka baxsan NSW fadlan wac Unuga Horiyada Macluumaadka 9716 2662.

Dadka la soo korsadey iyo qaraabodooda dhashay waxay heli karaan macluumaad ku saabsan soo korsiga haddii ay xaq u leeyihiin marka loo eego sharciga Sookorsiga ee ee 2000. si aad u ogaato inaad xaq u leedahay iyo in kale si aad u aragto macluumaadkan la xiriir Adeega Macluumaadka Qoyska ee Laanta Soo korsiga iyo Adeegyada Xaannaanada Joogtada ah 9716 3002.

Unuga Xoryada Macluumaad  
9716 2662

## BIXINTA IYO SHARCIYEYNTA ADEEGYADA SOO KORSIGA

Waxaan iskuxirnaa sookorsiga carruurta ee NSW – ee carruurta Australiyanka ah iyo kuwa dibeda ku dhashay, annagoo u heleyna qoysas ku haboon oo lagu meeleeyo iyo siinta taageero meeleeyntaas.

Sookorsiga waxaa sameeya DoCS iyo wakaalado soo korsi oo la sharciyey sida Barnardos, Centacare iyo Anglicare. Waxaa laga dhigey kuwo uu qabanayo sharciga Maxkamada Sare ee NSW.

DoCS waxay sameysaa soo korsiga carruurta dibeda ka yimid Macluumaad faahfaahsan waxaa laga helayaa website keena ah [www.community.nsw.gov.au/option](http://www.community.nsw.gov.au/option).

Soo korsiga iyo Adeegyada  
Xannaanada Joogtada  
9716 3002 ama wacitaan  
bilaash ah 1800 049 956

## DHISIDA IYO HORUMARINTA BULSHOYINKA



Waxaan leenahay barnaamijyo badan si loo dhiso loona xoojiyo bulshooyinka.

**Qoysaska marka hore** – waa istaraatiijiyad dhan oo ay dawladu ku caawineyso waalidka iyo xannaaneeyayaasha inay siiyaan carruurtooda bilow wanaagsan oo nololeed. DoCS waxay maalgelisaa adeegyo badan oo taageero oo ay ku jiraan booqashada guriga oo iskaaga ah iyo playgroups-ka. Caafimaadka NSW wuxuu maalgeliyaa booqashooyinka guud ee guriga oo ay booqanayaan kalkaaliyayaasha carruurnimada hore iyo Wasaarada Waxbarashada iyo Tababarada waxay ku lug leedahay barnaamijyada u kala wareega dugsiyada. Gal [www.families.nsw.gov.au](http://www.families.nsw.gov.au) wixii macluumaad ah ee dheeraad ah.

**Mustaqbalo wanaagsan** – waxay ujeedadeedu tahay in dhalinyarada jirta 9-18 lagu xiro waxbarashada, bulshooyinkooda iyo qoysaskooda. Waa istaraatiijiyad dawladeed oo lagu taageerayo u wareegida qof weynimo oo caafimaad iyo ammaanba leh.

**Ilmaha Aborjoniiska ka ah, Istaraatiijiyada Qoyska iyo Dhalinyarada** – waxay siisaa barnaamijyo badan oo taageero carruurta Aborjoniiska ah iyo dhalinyarada wakhtiga dhalashada ilaa ay ka gaarayaan 18 sanno, waxayna taageertaa qorshayaasha bulshada degaanka iyo wax abuuritaanka cusub.

**Dhisayaasha Bulshada** – website lagu wada xiriirayo oo dadka ka caawinaya inay wadaagaan macluumaadka ku saabsan mashruucyada bulshada oo hal abuurka leh iyo taageerada dawlada ee la heli karo. Gal [www.communitybuilders.nsw.gov.au](http://www.communitybuilders.nsw.gov.au).

**Xoojinta Bulshooyinka** – waxay gudbisaa mashruucyo badan ee meelaha hogaaminta bulshada iyo ka qayb galka, Masuuliyada Bulshada ee Shirkadaha iyo Daraasaadka cilmi baarista, oo looga danleeyahay kor u qaadida bulshooyin xoog leh.

**Istaraatiijiyada NSW ee Yareynta Rabshada ka soo horjeeda Dumarka** – waa istaraatiijiyad dawladeed oo dhan si loo yareeyo oo adkeysiga rabshada dumarka iyadoo la isticmaalayo waxbarasho iyo istaraatiijiyoyinka ka hortaga iyo iyadoo la hagaajinayo iskuxirka jawaabaha laga bixiyo rabshada wakaalada oo dhan.

**Qorshada Caawimaada Goobeed** – wuxuu bixiyaa qiyaastii \$10 milyan oo deeqo ah sannad kasta oo la siiyo ururada bulshada iyo golayaasha si loogu sameeyo mashruucyo xoojinaya bulshooyinka oo ka caawinaya dhisitaanka bulsho cadaalad iyo sinaanba leh.

**Istaraatiijiyada Dambiga iyo Xalka Bulshada** – waxay bixisey \$50 milyan muddo shan sanno ah oo ay ku bixisey 250 mashruuc in ka badan si ay u siiso jawaab hal abuur leh arimaha saameynaya bulshooyinka, gaar ahaan ka hortaga bulshada.

## CAAWINTA DADKA AY WAXYEELEYSAY MASIIBOYINKA DABIICIGA AH IYO KUWA KALE



Inta lagu jiro xaaladaha degdega ah sida dabka keymaha, daadaka, duufaanada waaweyn ama dhul gariirada, waxaan isku xirnaa adeegyada lamaanayaalkayaga bulshada sida Salvation Army, Adra, Red Cross, Anglicare iyo St Vincent de Paul.

Waxaan siinaa ka nasasho isla markiiba ah iyo caawimaad si aan uga caawino in dadku ay dib ugu laabtaan noloshoodii caadiga ahayd sida ugu dhakhsaha badan. Tan waxaa ka mid noqon kara cunto, dhar, hoy iyo caawimaad lacageed oo isla markiiba ah. Waxaan sidoo kale sameyn karnaa caawimaad lacageed oo wakhti dheer si loo caawiyo inay guryuhu ahaadaan kuwo kuwo la deganaan karo oo ammaan ah.

Xarunta Ka soo kabsiga Masiibada ee Gobolka  
8855 5111 ama  
wecitaan bilaash ah  
1800 018 444

## SIINTA ADEEGYO TAAGEERO SI LOO CAAWIYO DADKA GURIGA LA'

Barnaamijka Caawimaada Hoyga la Taageero wadajirka ah ee Dawlada Dhexe/ta Gobolka (SAAP), waxaan maamulnaa barnaamijka ugu balaaran ee dadka guriyaha la' ee Australia

SAAP waxay taageertaa dadka guri la'aanta ah ama khatarta ugu jira guri la'aan inay dib caadi ugu noqdaan. Waxaan qabanaa adeegyo badan anagoo marsiineyna wakaaladaha aan dawliga aheyn, oo ay ku jiraan hoyga, si dadka loogu caawiyo inay madax bannaanidooda dib ugu helaan.

Waxaa jira 400 oo mashruuc oo ku saleysan bulshada oo ay SAAP leedahay NSW oo ka shaqeynaya inay taageeraan dadka dhalinyarada ah, raga kelida ah iyo dumarka iyo qoysaska, iyo sidoo kale dumarka iyo carruurta ka soo baxsanaya rabshada guriga.

Xarunta Macluumaadka Dadka guriga la'  
9265 9081 ama wecitaan  
bilaash ah 1800 234 566

Khadka Taleefanka Hoyga Degdega ah ee Dhalinyarada waa  
9318 1531 ama wecitaan  
bilaash ah 1800 424 830

# MAALGELINTA IYO SHARCIYEYNTA ADEEGYADA CARRUURTA SIDA DUGSIGA KA HOR IYO XANNAANO MAALMEEDKA



Waxaan hubinaa in la helo adeegyo carruureed badan si ay ugu haboonaadaan baahida qoysaska.

Kuwan waxaa ku jira Dugsiga ka hor, xannaano maalmeedka dheer, xannaanada dugsiga ka hor iyo ka dib, xannaano xiliyeedka iyo xannaanada fasaxa.

Meelaha baadiya aha waxaan ka caawinaa in la sameeyo adeegyo carruureed guur guura oo ujeedooyin badan.

Waxaan liisan siinaa adeegyada carruurta ee NSW, una dejinaa heerarka la rabo inay dhammaan adeegyada carruurta inay ku shaqeeyaan.

Waxaan sidoo kale maalgelinaa Adeega Gudbinta iyo Macluumaadka Qoyska iyo carruurta oo kaa siin kara macluumaad dheeraad ah adeegyada carruurta ee NSW oo dhan.

Gal website kayaga [www.community.nsw.gov.au](http://www.community.nsw.gov.au) wixii macluumaad ah ee ku saabsan doorashada xarun xannaano.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan adeegyada goobta aad degan tahay, waxaad ka helaysaa lambarada xiriirka xafiisyo goboleedka ee DoCS bogga ku xigga.

Adeega Gudbinta  
Macluumaadka Qoyska  
iyo Xannaanada  
Carruurta 8594 4244  
ama wecitaan bilaash  
ah 1800 803 820

## LAMBARADA XIRIIRKA



**Si aad u soo sheegto waxyeelo carruureed iyo dayacaad 24-kii saac maalintii,**

**7-da maalmood ee toddobaadka wac Khadka Caawimaada taleefanka ee 132 111**

Xafiisyo Goboleedka DoCS

Xafiiska Weyn Shantaraalka 9716 2222 (8:30 subaxnimo – 5.00 galabnimo)

4-6 Cavill Avenue Ashfield 2131

Locked Bag 4028 Ashfield NSW 2131

Fadlan ogow: waxa lagu galo dhammaan taleefanada buuggan yar waa 02 ilaa wax kale lagu sheego mooyee.

### Metro Central Region

Redfern 8303 7600

### Metro South West Region

Bankstown 9781 5555

### Metro West Region

Parramatta 9354 1800

Blacktown/ Baulkham Hills 9830 1000

Nepean 4722 7400

### Hunter & Central Coast Region

Central Coast 4336 2401

Hunter 4985 1666

### Northern Region

Ballina 6686 1999

Mid-North Coast 6563 7800

New England 6738 8100

### Southern Region

Illawarra 4222 8400

Queanbeyan 6229 7202

### Western Region

Central West 6361 6990

Orana Far West 6841 3240

Wagga Wagga 6937 9400

## Xarumaha Adeegyada Bulshada DoCS

Albury	6058 4900	Cowra	6341 1855	Muswellbrook	6543 2455
Armidale	6738 8200	Dareton	03 5019 8900	Narrabri	6790 6000
Auburn	9335 4100	Deniliquin	03 5882 2500	Nowra	4424 5100
Ballina	6686 1999	Dubbo	6884 5877	Nyngan	6831 1000
Bankstown	8713 7800	Eastern Sydney	8303 7688	Orange	6361 6999
Batemans Bay	4472 4678	Edgeworth	4958 0600	Parkes	6862 1422
Bathurst	6333 0300	Epping	9815 0700	Parramatta	9354 1888
Bega	6499 0500	Fairfield	9205 6000	Penrith	4722 7300
Blacktown	9830 1000	Glen Innes	6732 4925	Port Macquarie	6580 3700
Bourke	6872 2188	Gosford	4336 2400	Queanbeyan	6229 7200
Bowral	4861 0700	Goulburn	4828 5500	Raymond Terrace	4987 1022
Brewarrina	6839 2482	Griffith	6961 8500	St George	9585 7222
Broken Hill	08 8087 2844	Hawkesbury	4574 6666	St Marys	9673 4777
Burwood	8372 9000	Ingleburn	9765 6111	Shellharbour	4255 6666
Campbelltown	4621 5600	Inverell	6728 2700	Sutherland	8536 1111
Central Sydney	8303 7666	Katoomba	4782 3066	Tamworth	6768 4600
Cessnock	4993 5000	Kempsey	6562 1385	Taree	6591 2100
Charlestown	4985 1500	Lakemba	9704 7100	Tumut	6947 4100
Chatswood	9406 9777	Leeton	6953 9700	Tweed Heads	07 5569 9330
Clarence Valley	6641 2400	Lismore	6623 4900	Ulladulla	4454 7744
Cobar	6836 1360	Lithgow	6351 4688	Wagga Wagga	6937 9300
Coffs Harbour	6659 1555	Liverpool	8778 3300	Walgett	6828 1409
Condobolin	6890 1100	Maitland	4939 4800	Wilcannia	08 8091 5050
Cooma	6450 2888	Mayfield	4974 3700	Wollongong	4222 8600
Coonabarabran	6826 6000	Moree	6750 7300	Wyong	4352 6500
Coonamble	6827 1400	Mount Druitt	8887 7400	Yass	6226 7300
Cootamundra	6942 1555	Mudgee	6372 5700		

## Adeegyada DoCS

Adoption Information Unit	9716 3002 or 1300 799 023
Children's Services Licensing and Regulatory Support line	1800 619 113
Disaster Recovery Centre	8855 5111 or 1800 018 444 (9am-5pm)
Domestic Violence Line (24 hours)	1800 656 463
Foster Care Recruitment	1800 2 Foster (1800 236 783)
Helpline (24 hours)	132 111

## Lambarada kale ee muhiimka ah iyo website yada

Alcohol and Drug Information Services (24 hours)	9361 8000	<a href="http://www.druginfo.nsw.gov.au">www.druginfo.nsw.gov.au</a>
Child Care and Family Information	8594 4244 or	1800 803 820
Commission for Children and Young People	9286 7276	<a href="http://www.kids.nsw.gov.au">www.kids.nsw.gov.au</a>
Department of Family and Community Services (Commonwealth)	1300 653 227	<a href="http://www.facs.gov.au">www.facs.gov.au</a>
Homeless Person's Information Centre	9265 9639 or	1800 234 566
Kids Help Line	1800 551 800	
Lifeline (24 hours)	131 114	
Office of the Children's Guardian	8219 3600	<a href="http://www.kidsguardian.nsw.gov.au">www.kidsguardian.nsw.gov.au</a>
Parent Line (24 hours)	9787 0855 or	1300 1300 52
Translating and Interpreting Service	131 450	
Youth Emergency Accommodation Line (24 hours)	9318 1531 or	1800 424 830 <a href="http://www.yaa.com.au">www.yaa.com.au</a>

[www.community.nsw.gov.au](http://www.community.nsw.gov.au)

[www.communitybuilders.nsw.gov.au](http://www.communitybuilders.nsw.gov.au)

[www.youth.nsw.gov.au](http://www.youth.nsw.gov.au)

[www.parenting.nsw.gov.au](http://www.parenting.nsw.gov.au)

[www.aboutdaterape.nsw.gov.au](http://www.aboutdaterape.nsw.gov.au)

[www.cityofsydney.nsw.gov.au/Community/HomelessnessServices](http://www.cityofsydney.nsw.gov.au/Community/HomelessnessServices)

Lambarada xiriirka degdega ah ee 24 saac waxay ku qoran yihiin gudaha jeldiga hore ee dhammaan buuggaga taleefanada.

Si aad uga soo warbixiso qof dhalinyaro ah ama ilmo  
khatar ugu jira waxyeelo ama dayacaad la xiriir

**Khadka Caawimaada DoCS 132 111**

**TTY 9633 7698**

**[www.community.nsw.gov.au](http://www.community.nsw.gov.au)**